



Su'aalaha Inta Badan Laiska Weydiiyo Daraasadda Kiiska COVID-19

- Qof kastoo laga helay COVID-19 oo jooga Oregon waa inuu buuxiyo daraasadda. Haddii aad ka yartahay 15 sano jir, kadalbo waalidka/ama mas'uulka inuu kula buuxiyo foomka.
- Daraasadda waxaa lagu helayaa 12 luuqadood.
- Waxaad u baahnaan doontaa internet si aad u buuxiso Daraasadda Kiiska COVID-19. Haddii aadan heysan internet ama aad u baahan tahay cawimaad toos ah, fadlan garaac 866-917-8881 si aad ula hadasho xirfadle qaabilsan caafimaadka dadweynaha.
- Qiyaastii waqtiga lagu buuxiyo daraasadda waxaa uu u dhexeeyaa 20-45 daqiiqo.

Maxaan sameeyaa haddii la iga helo fayraska?

- [Go'doomin.](#)
- [Dadka aad aad xiriir u leedihiin u sheeg](#) iyo qof kastoo aad dhawaan aad ugu dhawaatay.
- Miyaad qabtaa su'aalo, ama aad u baahan tahay cawimaad? Garaac 866-917-8881 si aad ula hadasho xirfadle qaabilsan caafimaadka dadweynaha.
- Buuxi [Daraasadda Kiiska COVID-19.](#)

Q. Waa maxay Daraasadda Kiiska COVID-19?

Waa daraasad loogu tala galay dadka laga helay COVID-19. Waxaa gudaheeda lagu weydiiyaa dadka isla su'aalihii xirfadleyaasha caafimaadka dadweynuhu weydiinayeen walina weydiyaan markii ay wacaan dadka laga helay fayraska. Ka dhigidda daraasadaan mid ah onlayn, waxay u saamaxdaa Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) inuu soo uruuriyo isla macluumaadka aanu isticmaalaynay intii safmarku uu soo jiray oo dhan kuna saabsan sida COVID-19 uu u saamaynayo adiga iyo bulshadaada.

Q. Waa maxay sababta aan u samaynayo daraasaddaan?

Daraasadaan waa tabarucaad. Jawaabahaaga daacadda ku dhisan waxay naga caawiyaan inaan fahanno sida fayrasku ugu dhex faafayo bulshadaada dhexdeeda

iyo sidii aanu usiin lahayn kuwa ugu baahida badan agabyo ay kusii ahaadaan dad caafimaad qaba.

S. Muddo intee dhan ayay qaadan doontaa?

20-45 daqiiqo ayadoo ay ku xiran tahay nooca hawlaha aad samaysay kahor iyo kadib markii aad xanuunsatay, iyo taariikhdaada caafimaadka.

Q. Waa maxay sababta aanu uga soo wareegeyno koolasha taleefanka daraasadda lagu samaynayo oo aanu ugu wareegeyno daraasadda xaaladda ee onlaynka ah?

Maamulka caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah wuxuu isku dayay inuu la xiriiro xaalad kasta, laakiin maadaama xaaladuhu kordheen dad bandanna ay isku baarayaan guryaha dhexdooda, tirada dadka uu la xiriiri karo ayaa hoos u dhacaysa. Waxaanu kaa dalbaynaa inaad nagu caawiso macluumaadkaan muhiimka ah adigoo adeegsanaya daraasad onlayn ah, si shaqaalaha xaddidan ee caafimaadka dib mudnaan loogu siiyo inay soo baaraan dillaacidada halista badan ee fayraska iyo bixinta adeegyada kale ee caafimaadka dadweynaha ee muhiimka ah.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.